

Horumarinta luqadeed ee luqad-badnida



XAQIIQ

Carruur oo dhan waxay baran karaan luqado badan. Xitaa carruurta korriimadoodu habsaanto iyo kuwa waxbarashada ku dhibban

Qoysasku waa inay ku hadlaan luqadda ay ugu kalsoonida badan yihiin, si ay carruurta u helaan tusaale luqadeed ay raacaan oo wanaagsan, ulana macaamili karaan dadka kale ee isla luqadda ku hadla

Luqad-badnidu MA keento dibudhac horumar luqadeed, ee waxaa la ogaaday inay kordhiso awoodda carruurta ee barashada ereyada cusub, garashada dhawaaqyada iyo xallinta mas'alooyinka

”Isku dhafka luqadeed” wuxuu dhacaa markuu qof isku daro sifooyinka naxwe ahaaneed ee luqadaha uu ku hadlo. Taasina waxay dhalisaa wacyi dhaqameed iyo mid luqadeed

Barashada luqaddu waa geeddisocod firfircoon oo u baahan inay carruurta helaan fursado ay dad kale si wadajir ah ugu tabobartaan. Dhageysi iyo ka jawaabis waxay lama huraan u yihiin horumarinta aqoonta luqadeed

KU-TIRO-KU-TEEN

Ilmuhu wuu ku ”jaahwareeri” karaa in luqado kala duwan oo badan lagula hadlo

Waxaa wanaagsan in qoysku ay ku hadlaan oo keliya luqadda lagu barto iskuulka, xitaa haddii aysan si fiican luqaddaas ugu hadlin

Carruurta yaryar ee luqadaha badan horumarkooda luqadeed wuu gaabiyaa marka loo barbardhigo carruurta ku da’da ah ee halka luqad ku hadla

Carruurta luqadaha badan ma aha inay habayaraatee isku qasaan qaybo ka mid ah luqadaha ay ku hadlaan

Carruurta waxay noqonayaan luqad-badneyaal iyagoo uun dhegeysta dadka ku wareegsan oo ku hadlaya luqado kale